

WAREEGTADA LAMBARKEEDU YAHAY. 20-24

KU KORDHINTA BAAQA XAALADDA DEGDEGGA AH EE COVID-19 (AMARKA SARE EE LAMBAR 20-03) 60 MAALMOOD OO KALE, ILAA LUULYO 6, 2020

Amarka Sare ee 20-03, oo ku baaqayey xaalad degdeg ah ka dillaaca COVID-19 dartii ee Oregon, waxa la soosaaray Maarso 8, 2020, waxaanu ku baaqey xaalad degdeg ah oo gobolka oo dhan ah muddo 60 maalmood ah, ilaa Maajo 7, 2020.

Sida waafaqsan ORS 401.165 iyo ORS 401.204, waxaan ogaaday in caabuqyada cudurka fayraska corona (COVID-19) sii wado inuu halis galiyo caafimaadka iyo badbaadada bulshada, oo uu sii ahaanayo xaalad degdeg ah oo gobolka oo dhan sida waafaqsan ORS 401.025. Sidaa darteed, waxaan ku kordhinayaa xaaladda degdegga ah 60 maalmood oo kale, ilaa Luulyo 6, 2020. Amarka Sare ee 20-03 wuxuu sii ahaanayaa mid dhaqangal ah ilaa Luulyo 6, 2020, ilaa uu kordhiyo ama uu xilli hore soo afjaro Badhasaabku.

Waxaa lagu sameeyay Salem, Oregon maalintaa 1^{aad} ee Maajo, 2020.

Kate Brown
GUBANATORE

CADDAYN:

Bev Clarno
XOGHAYAHA ARRIMAHA DIBADDA